



Oslo kommune

Dugsiga Xannaanada Ilmaha Oslo

Barnehage (dugsiga xannaanada ilmaha) waa meel maalinta lagu daryeelo carruurta jiro 0 ilaa 6 jir. Barnehage'ka waa tallaabada koowaad ay carruurta ku qaadaan waxbarashooda, iyo wuxuu qayb muhiim ka yahay u diyaarinta carruurta dugsiga.

Carruurta si fiican ayaa lagu ilaaliya Barnehage waxaana wax baro dad wayn ee daryeel fiican baxsha. Way ku ciyaaraan iyo waxay ka qayb qaataan wax-qabadyado baaxad wayn leh, isla markiina waxay bartaan luqada Norweejiaanka.

Barnehage'ka dowladda hoose waxay furan yihiin saacadaha u dhexeeyo 07:30 ilaa 17:00.

Gormee aayuu cunug bilaabi karaa Barnehage? Barnehage'ka badnaantiisa waxay qabaan boos loogu talagalay carruurta 10 bilood jirka iyo ka wayn. Haddii aad Barnehage boos ugu baahan tahay ilmo da'daas ka yar, waxaad ilmahaada gayn kartaa Kristent Interkulturelt Arbeid (KIA) ee magaalada Oslo bartamheena ku yaalo. Waxay ogol yihiin carruur ka yar 3 bilood.

Waa imisa qiimaha Barnehage?

Qimaha hal cunug markii la geeyo Barnehage waa ugu badnaan NOK 2,730 bishiiba. Haddii dakhligaaga hooseeyo ama dhowr carruur dhigtaan Barnehage, lacag ka yar ayaad bixin doontaa. Qaar ka mid ah dadka waxay xaq u leeyihiin boos Barnehage bilaash ah.

Dawladda hoose ayaa kuu sheegi doono qiimaha aad bixin doonto:

www.oslo.kommune.no/barnehage/pris-og-betaling

Qiimoyin kala duwan ayaa lagu dallacaa CIA Barnehage, iyo kuwaani waxaa loo xisaaba waqtiga la joogo Barnehage.

Codsiga boos Barnehage

Waqtiga ugu dambeeyo ee la soo diri karo codsiga boos Barnehage waa 1 Maarso. Haddii aad codsi sameyso waqtiga ugu dambeeyo ka hor, iyo cunuggaaga noqon doono hal jir ama ka badan bisha Nofeembar ee isla sanadka, waxaa lagu soo diri doonaa codsiga boos Barnehage ee bilaaban doono wax u dhexeeyo Agoosto iyo Nofeembar. Haddii aad codsiga samayn weyso waqtiga ugu dambeeyo ka hor, weli codsi ayaad soo diri kartaa, laakiin wuxuu ku qaadan karaa waqti ka dheer in boos lagu helo.

CIA Barnehage, ayaga ayaad si toos ah codsi ugu sameyneysaa waqti walba ee sanadka.

Waxaad heli kartaa liiska Barnehage iyo meelaha ay ku yaalaan bogga internetka dowladda hoose. Waxaad xittaa heli kartaa macluumaad ku saabsan Barnehage kala duwan, ay ku jirto saacadaha furitaanka iyo da'da la rabo inuu cunugga ahaado si uu xaq u lahaado booska Barnehage gaar ah.

www.oslo.kommune.no/barnehage

Waxaad codsi boos Barnehage ka samayn kartaa bogga internetka dawladda hoose.

Haddii aad u baahan tahay in lagugu caawiyo samaynta codsiga, fadlan la xiriir xaruntaada adeegga xaafadda.

